



Liiska kala soocidda:



Qashinka haraaga ah

Kuwan ayaa ah qashin haraa ah:

- › Cafaayad iyo faashad
- › Buugaag galal adag leh
- › CD-yaal iyo cajalado fiidiyow ah
- › Warqadaha hadiyaha lagu duubto
- › Quraarad aan ahayn mid wax lagu duubto
- › Goome, maqaar iyo harag
- › Saxarada xoolaha, ciidda ay bisadaha iyo shimbiruhu ku saxaroodaan (caddad yar)
- › Weelasha dhalada ah ee wax lagu foorneeyo
- › Dambas qabaw
- › Nooc quraarad ah (Krystall)
- › Waxyaalaha laysku qurxiyo
- › Qashinka raashinka
- › Raashinka- iyo warqadaha wax lagu duubto
- › Waxyaalaha lagu ciyaaro ee balaastigga ah, leegada iwm.
- › Balaastig aan ahayn mid wax lagu duubto
- › Dhoobo
- › Muraayad
- › Bacaha huufarka
- › Bacaha maraqa

KULLIGOOD BAC AYAA INTA LAGU RIDO AYAA SI WANAAGSAN LOO XIRAYAA

- › Curbadda saliingaha (warqadaha wargeysyada ayaa si fiican loogu duubayaa ama lagu ridayaa dhalooyinka cabbitaanka iwm.)
- › Baakad iyo warqad la wasakheeyay
- › Warqad kuwa wax lagu duubto ah oo la wasakheeyay
- › Warqadaha wax lagu tirtiro/ qallajiyo
- › Dhar iyo kabo dhammaaday
- › Muraayadda daaqadaha, jabtay (si fiican ayaa loo baakaynayaa)

FG! Wax walba waa in bac lagu ridaa



Baakad iyo warqad

Kuwan ayaa warqad / baakad loo yaqaanaa:

- › Wargeysyo
- › Buugaag, kuwa aan jaldiga adag lahayn oo keliya
- › Baakadaha cabbitaanka (ka daadi waxa ku jira oo isku laab, middood dhawr kale dhex geli)
- › Baakadaha ukunta
- › Xayeesiis
- › Bokhshado (xataa kuwa daaqadda bannaan leh)
- › Baakadaha cabbitaanka iyo macmacaanka
- › Baakadaha raashinka (baakadaha biisaha iwm)
- › Warqadaha wax lagu qoro
- › Wargeysyada
- › Wargeysyada toddobaadlayaasha ah
- › Baakadaha saabbuunaha wax lagu dhaqdo

BAAKADHA IYO WARQADHA IYAGA OO AAN WAXBA LAGU XIRXIRIN AYAA LA TUURAYAA

- › Baakad galoolan oo wax lagu duubto
- › Baakad (jeexjeex ama isku laab)

FG! Baakaduhu haddii ay badan yihiin waxaa la geeyaa goobta lagu celiyo (returpunkt) ama xarunta qashinka dib looga faa'iideysto (gjenvinningsstasjon)



Balaastigga wax lagu duubto

Kuwan ayaa balaastig wax lagu duubto loo yaqaanaa:

- › Bacaha jibiska
- › Baakadaha wax lagu duubto (hilibka, hilibka digaagga iwm.)
- › Baakadaha shukulaatada
- › Bacaha kafeega ee balaastigga ah
- › Kartoonnada balaastigga ah iyo furarka (kuma jiraan dhalooyinka la cesho oo lacagta lagu soo beddesho)
- › Bacaha wax lagu duubto ee balaastigga ah (Plastfolie) (balaastigga lagu duubo saabaanka cusub iwm.)

WAX WALBA WAXAA LAGU RIDAYAA BACO SI FIICAN AYAA AFKA LOOGA XIRAYAA

- › Jirigaannada caagga ah
- › Baco balaastig ah
- › Baaldi balaastig ah (baaldiga maraqa iwm.)
- › Warqadaha shukulaatada



Qashin khatar ah

Kuwan ayaa ah qashin khatar ah:

- › Batari
- › Aaladaha wax lagu caddeeyo, kolloriin iyo salmiyaak
- › Waxyaalaha baabuurta iyo doomaha la mariyo
- › Waxyaalaha lagu duubo qashinka khatarta ah
- › Guluub dhan iyo guluubka koronta dhaqaaleeya
- › Istiraashooyin leh saliidda miraha lin (linolje)/waxyaalaha wax lagu fujiyo (waxaa lagu shubayaa weel awdan oo ay biyo ku jiraan)
- › Heerkulbeegga meerkuriga
- › Quraaradda nalalka (waxaa lagu ridayaa baakaddii lagu soo gaday dabadeed-na santuukha ayaa la garab dhigayaa)
- › Rinji, dheeh, koollo
- › Waxyaalaha rinjiga iyo dheeha fujiya
- › Waxyaalaha dhirta difaaca
- › Waxyaalaha yaryar ee elektaroonigga ah (dab-sheegaha, taleefannada gacanta, timaqallajiyaha iwm.)
- › Daasadaha ay ku jiraan waxyaalaha la buufiyo
- › Qashinka dareere waxyaalo orgaanig ah (tjærevfall)

- › Aalkolada cad ee wax lagu dhaqo iyo midda guduudan iwm.
- › Waxyaalaha lagu ciyaaro (ee ku shaqeeya batariga/korontada)

- › Rasaasta iyo walxaha qarxa booliska ayaa loo geynayaa.
- › Daawooyinka dhacay waxaa la geynayaa farmashiyaha

FG! Curbadda saliingaha inta si fiican loo baakadeeyo ayaa lagu ridayaa qashinka haraaga ah.



Quraarad/bir

Kuwani waa quraarad iyo bir wax lagu duubo:

- › Waxyaalaha wax lagu dubo ee alumiiniumka ka samaysan (Aluminiumsformer)
- › Quraaradaha raashinka carruurta
- › Gasacadaha alxaman
- › Quraaradaha malmalaaddada
- › Dhalooyinka qamriga waynka

Waxyaalahan waxaa la soo celiyaa iyaga oo ah qashin haraa ah:

Weelasha dhalada ah ee wax lagu foorneeyo (Ildfaste former)
Nooc quraarad ah (krystall)
Dhoobo
Muraayad
Muraayadda daaqadaha, jabtay (si fiican ayaa loo baakaynayaa)



Waxaa la geyn karaa goobta qashinka lagu celiyo ama xarunta qashinka dib looga faa'iideysto. Goobta qashinka la geeyo ee kuugu dhow ka eeg www.trv.no